# SHATIGA DARAWALNIMADA EE LOOGU TALAGALAY DADKA OO DHAN

Oktoobar 1, 2023

**Waxaad u baahan doontaa inaad la timaado laba dukumeenti aqoonsi aasaasi ah ama hal dukumeenti aasaasi ah iyo dukumeenti labaad si aad u hesho shatiga caadiga ah ama kaarka aqoonsiga.**

**Dukumeenti kasta oo ku qoran luqad aan Ingiriisi ahayn waa in uu la socdaa tarjumaad iyo caddaynta tarjumaada.**

## DUKUMIINTIYADA ASAASIGA AH

- Baasaboor caalami ah oo aan dhicin oo ay bixisay xukuumad ( shisheeye ama mid gudaha ah).
- Diwaanka dhalashada oo la xaqiijiyay oo yimid xukun kasta (shisheeye ama mid gudaha): Oo ay ku jiraan:
  —Shahaadada Dhalashada ee Gobolku uu bixiyay
  —Shahaadada Dhalashada ee Dibadda
  —Shahaadada ku Dhalashada Dibadda (FS-545, DS-1350)
  —Warbixinta Qunsuliyada ee ku Dhalashada Dibadda (FS-240).
- Shahaado korsasho oo xaqiijisan oo ka timid xukun kasta (shisheeye ama gudaha) oo ay ku qoranyihiin magaca codsadaha iyo taariikhda dhalashadu.
- Kaarka Aqoonsiga Qabaa'ilka ee Minnesota oo aan dhicin oo leh astaamaha ammaanka.
- Mid ka mid ah dukumeentiyada soo socda oo aan dhicin oo ay soo saartay Waaxda Adeega Jinsiyadda iyo Socdaalka ee Mareykanka ama kuwii ka horreeyay:
  —Shahaadada Dhalasho siinta (Form N-550, N-570, N-578);
  —Shahaadada Muwaadinimada (Form N-560, N-561, N-645);
  —Kaarka aqoonsiga muwaadinka Maraykanka (Form I-179 or I-197);
  —Kaarka Deganaanshaha Joogtada ah ama Deganaanshaha Ajaanibka (Form I-551 or I-151);
  —Dukumeentiga ogolaanshaha shaqada (Form I-688, I-688A, I-688B, or I-766);
  —Kaarka Northern Mariana (Foom I-873);
  —Kaarka Hindida Maraykanka (Form I-872); ama
  —Dukumentiga Safarka Qaxoontiga ee Dib u soo Gelista (I-571).
- Kaarka aqoonsiga aan dhicin ee ay bixiso Wasaaradda Difaaca ee Mareykanka ee loogu talagalay ciidamada howlgelaya, kaydka, ama shaqaale hawlgab ah. Sidoo kale loo yaqaano:
  —Kaarka Aqoonsiga Heshiisyada Geneva
  —Kaarka Helitaanka Guud (Foomka DD 2).
- Dukumeentiga aqoonsiga qunsuliyad shisheeye.
- Shahaadada jinsiyadda Kanada oo ay ku lifaaqan tahay foom I-94 aan dhicin (waa in lakeeno dukumeenti labaad oo sawir ah oo ay bixisay wakaalad dawlada Kanada ah).

**Haddii magaca ku qoran dukumeentigaaga aasaasiga ah iyo ka labaad aysan waafaqsanayn magacaaga sharciga ah, waa inaad sidoo kale keento caddaynta beddelka magacaaga sharciga ah.**

- Caddaynta la aqbali karo waxay ka kooban tahay shahaado guur oo xaqiijisan, go'aanka furiinka ama amarro kale oo maxkamadeed oo xaqiijisan.
- Dukumentiyadaada beddelka magacu waxay u baahan yihiin inay muujiyaan xiriir cad oo ka dhexeeya dukumeentigaaga aasaasiga ah iyo ka labaad iyo waxa ku qornaan doona kaadhkaaga.

# DUKUMIINTIYADA LABAAD:

- Uu soo saaray Maamulka Sooshal Sikuuradku:
  —Kaarka Sooshal Sakuuradka:
  —Bayaanka siinta Kabidda Bulshada ee Dheeraadka ah oo la soo saaray wax aan ka badnayn 12 bilood kahor xilliga codsiga.
- Ay soo saartay Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Mareykanku:
  —Shahaadada u Qalmitaanka Xaalada Booqdaha Isdhaafsiga ah (Form DS-2019).
- Ay soo saartay Wasaaradda Amniga Gudaha ee Mareykanku:
  —Dukumeentiga ogolaanshaha shaqada (Form I-688, I-688A, I-688B, or I-766);
  —Shahaadada U qalmitaanka Xaalada Ardayga Aan Soogalootiga ahayn (Foomka I-20);
  —Ogaysiinta Tallaabada Dib loo dhigay ee Dadka ku Yimid Carruurnimada (Foomka I-821D);
  —Codsiga magangalyada iyo ka Joojinta ka saarista (Foomka I-589).
- Ay soo saaray xukuumad dawladeed (shisheeye ama mid gudaha ah):
  —Shatiga darawalnimada, kaarka aqoonsiga, ama ogolaanshaha barista, sawir leh, dhacay shan sano ama ka yar;
  —Shahaado guur oo la xaqiijiyey;
  —Amarka Maxkamadeed oo la xaqiijiyay oo ay ku qoranyihiin magaca iyo taariikhda dhalashadu;
  —Nuqul la xaqiijiyay oo ah go'aanka furiinka ama burinta guurka oo qeexaya magaca codsadaha ama beddelka magaca.
- Diiwaanada Iskuulka:
  —Koobiga qoraal muujinaya codsadaha magaciisa oo buuxa iyo taariikhda dhalashada oo ay caddeeyeen dugsiga sare ama tacliinta dugsiga sare kadib;
  —Kaarka aqoonsiga ardayga ee dugsiga sare oo hadda ah oo oo ay ku yaallan magaca ardayga, sawir ama sawir si elektaroonik ah loo saaray oo ardayga ah, iyo taariikhda dhalashada ardayga ama lambarka aqoonsiga ardayga ee gaarka ah;
  —Kaarka aqoonsiga ardayga ee dugsiga sare, koleejka, ama jaamacada ee xukun shisheeye ay ku qoranyihiin taariikhda dhalashada iyo sawirka codsadaha da'da markii diiwaanka la soo saaray;
  —Kaarka aqoonsiga ardayga ee dugsiga sare, koleejka, ama jaamacada ee xukun shisheeye oo wata qoraal shahaado ah oo dugsiga ka yimid.
- Ay soo saartay Waaxda Gaadiidka, Maamulka Duulimaadyada Federaalka ee Mareykanka:
  —Shatiga duuliyaha ee hadda ansax ah.
- Ay soo saartay Wasaaradda Difaacu:
  —Kaarka Helitaanka Guud (Common Access Card) ama Aqoonsiga iyo Kaarka Mudnaanta (Foomka DD-1173), ee loogu talagalay dadka ku tiirsan shaqaalaha ciidamada howlgalka ah;
  —Shahaadada Siideynta ama ka soo Saaritaanka (Foomka DD-214).
- Ay soo saaray Waaxda Booliiska Maraykanka ama Xafiiska Sheriff-ka Degmada ee Mareykanka:
  —Ogolaanshaha aan dhicin ee lagu qaadan karo hub ama hub qarsoon, oo wata sawirka codsadaha.
- Ay soo saartay Waaxda Caymiska Shaqala'aanta ee Minnesota:
  —Warbixinta nacfiyada oo la soo saaray wax aan ka badnayn 90 maalmood ka hor codsiga.
- Ay soo saaray Waaxda Adeega Dakhliga Gudaha:
  —Dukumeenti leh lambarka aqoonsiga cashuur bixiyaha.
- Ay soo saaray Waaxda Adeegyada Darawalka iyo Baabuurta ee Minnesota:
  —Shahaadada lahaanshaha oo la bixiyay wax aan ka badnayn 12 bilood kahor codsiga.
- Ay soo saartay Waaxda Asluubta ama Xafiiska Federaalka ee Xabsiyada:
  —Kaarka aqoonsiga oo ay ku qoranyihiin magaca codsadaha oo buuxa, taariikhda dhalashada, iyo sawirka codsadaha.
- Dukumentiga Canshuurta Hantida Minnesota oo muujinaya qaybta ciwaanka deegaanka maamulaha codsadaha ah iyo qaybta cinwaanka boostada iyo qaybta sheegaysa hantida la cashuurayo labadaba:
  —Bayaanka canshuurta hantida Minnesota ee sanadka hadda ama kahor ah;
  —Ogaysiiska canshuurta hantida Minnesota ee la soo jeediyay ee sanadka hadda socda ah.
- Warqada hantida oo la xareeyay ama lahaanshaha guriga ee codsadaha.
- Dukumentiyada amaahda guryaha ee codsadaha.
- Ay soo saaray dawladda Maraykanka ama dawladda Kanada oo aan dhicin:
  —Kaarka aqoonsiga sawirka leh ee shaqaalaha
- Awaamiirta militariga ee wali dhaqangalka ah wakhtiga codsiga.
- Kaarka Adeega Xulashada (Selective Service).
- Kaar ansax ah ee aqoonsiga gargaarka caafimaadka ama barnaamijka gargaarka ama barnaamijka adeeyada bulshada.
- Kaarka caymiska bulshada ee Kanada.
- Kaarka doorashada federaalka ee xukun shisheeye oo la bixiyay Janaayo 1, 1991 ama kadib, kaas oo uu ku yaallo sawirka codsaduhu.

DEPARTMENT OF PUBLIC SAFETY · STATE OF MINNESOTA

DVS Driver & Vehicle Services